

Dufunta bullaacadaha ka ilaaliya

Cilladaha bullaacadaha ma ahan wax lagu farxo, wayna kharash badan yihiiin hagaajintooda. Sababta cilladaha bullaacadaha ee ugu wayn waxaaa weeyaan dufunta, oo lagu shubay weelka alaabta lagu mayro.

Saliidda iyo subagga kulul way dareeraan. Markii bullaacadaha ku dhacaaan waxay noqdaan qaboow kaddib way adkaadaan. Kadibna buro ayaa samaysma kuwaas oo xira bullaacadaha

Sidee baa dufunta bullaacadaha loogu ilaaliyaa?

Kahor inta aadan mayrin weelka wax lagu shiilo ama digsiga ku tirtir xaansho. Xaanshidaas weelka qashin ayaa ku tuuri kartaa ama bacda loogu talagalay qashinka la gubo.

Isticmaal masafad bay` adda u roon. Masafadda waxaad ku shubi kartaa:

- Dufunta wax lagu shiilay oo qaboow noqotay
- Salidda wax lagu shiilo
- Saliidda sida tusaale formaajada fetaost ama gnaagnada qallan

Markii quraaradda ay buuxsanto ka saar musaafadda kaddib ku dabool gufka. Kaddib waxaad geeysa goobaha dib u warshadaynta återvinningscentral. Markaas kaddib dufunta dib ayaa loo warshadayn doonaa oo la isticmaali doonaa.

Laakin waxaad xitaa quraaradda ku tuuri kartaa bacda qashinka ee la gubo. Xaaladdaas waxaa loo isticmaali doonaa shidaalka guryaha lagu kululeeyo.



Masadda bay`adda halkee ban ka soo qaataa?

Masadda oo lacag la`aan waxaad ka soo qaadan kartaa goobaha dib u warshadaynta Återvinningscentral ee kugu dhow ama xarunta macaamiisha ee Dowladda hoose.

Shirkadaha guryaha, ururrada iskaashatada ama milkiyeasha guryaha qaarkood waxaa laga helaa Masadda bay`adda.